



Fayraska Hanta (Hantavirus)

Xaashida Xogta



Fayrasyada hanta waa koox fayrasyo ah oo inta badan ay qaadaan jiiirarka qaarkood. Gudaha Maraykanka, tani waxay ku jiraan qaar ka mid ah dooliyada iyo jiiirarka. Caabuqa Fayraska Hanta wuxuu sababi karaa cudurro kala duwan.



Fayraska Hanta wuxuu ku faafaa qaadashada neefta candhuufta, kaadida, saxarada, ama agabka buulka jiiirka cudurka qaba oo hawada ku jira. Way yar tahay in qaniinyada jiiirku ay sababto fayraska hanta. Caadi ahaan kuma faafo qof ilaa qof kale.

Calaamadaha iyo Astaamaha



Qandho iyo Qarqaryo



Murqo Xanuun



Madax xanuun



Lalabo iyo Matagid



Shuban



Qufac

Calaamadaha sidoo kale waxaa ka mid noqon kara dawakhid. Xaaladaha daran, neefta oo yaraata iyo qufac ayaa sababi kara in dheecaan ku uruuro sambabada iyo in ay dhacdo hawo yari daran oo dhiiga ah. Calaamaduhu badanaa waxay ka bilaabmaan hal ilaa siddeed toddobaad kadib marka fayraska la soo qaado.



La hadal bixiyahaaga daryeelka caafimaadka haddii aad yeelato mid ka mid ah calaamadahan iyo astaamahan kadib markaad taabato jiiirarka. Ma jiro daawo gaar ah oo loo hayo fayraska hanta.

Ka Hortagga Fayraska Hanta

Habka ugu fiican ee looga hortagi karo fayraska hanta waa in laga saaro ilaha cuntada, biyaha, iyo waxyaabaha hoyga u noqda jiirrarka.



Sharootey

Sharootey godadka ama daldaloolada gudaha iyo bannaanka guriga



Dabinka Dhig

Isticmaal dabinnada degdegga ah si loo qabto dooliyada iyo jiirrarka



Nadiifi

Ka takhalus ilaha cuntada jiirka ee suurtoogalka ah

Si loo tirtiro raadadka jiirrarka:



Fur albaabbada iyo daaqadaha si hawo nadiif ah u soo gasho ugu yaraan 30 daqiiqo **kahor** inta aadan nadiifin goobta



Xiro galoofyo iyo maaskaraha boorka celisa **kahor** nadiifinta



Weligaa ha isticmaalin faakuum ama xaaqin si aad ugu nadiifiso saxarada ama agabyada buulka jiirrada



Ku buufi dhibcooyinka jiirka warankiilo iyo biyo ka dibna isticmaal tuwaal warqad ah si aad u soo qaadatid kaadida iyo dhibcaha

Macluumaad Dheeraad ah, Booqo:



1. www.maine.gov/dhhs/hantavirus
2. www.cdc.gov/hantavirus
3. www.cdc.gov/healthy-pets/rodent-control/

Waxaad sidoo kale aad wici kartaa Maine CDC lambarka 1-800-821-5821.